



# Xidhmooyinka Gargaarka Degdega ah

## Emergency relief packages - Somali

Xidhmooyinka rashiinka gargaarka degdega ah ayaa bilaash lagu heli kara haddii aadan rashiin helin karin koronafays awgiis (KOVID-19).

Ma u baahinid inaad tahay muwaadin Australian ah ama qof si joogta ah u degan si aad u hesho xirmada gargaarka degdega ah.

Si aad u heshid xidhmada rashiinka gargaarka ah, waa inaad:

- ku jirtaa go'doon ama karantiil korona fayras awgiis ah, aad sugaysaa natiijada jawaabaha baarista, ama qof xidhiidh dhow la leh
- aanad lahayn asaxaab, qoys ama dadka kale oo ku caawin karaa adiga.

Si aad u hesho xidhmada, wac khadka korona fayras **1800 675 398** oo dooro ikhtiyaarka taageerada dadka qaba korona fayras (tani waxaa ku jirta gargaarka rashiinka). Haddii aad u baahan tahay turjumaan, dooro ikhtiyaarka 0 marka aad wacayso khadka.

Haddii aadan wici karin khadka, qof aad garayneysoayaa kuu wici kara.

Waxaad sidoo kale heli kartaa kaalmada dhaqaale haddii ay waydo shaqadaada. Wixii macluumaad ah wac kkhadka koronafayras.

### Maxaa ku jira xidhmada?

Rashiinka aasaaasiga ah waa sida firilayda, caanaha cimriga dheer (long-life milk), sokor, baasto iyo khudradda gasacadaysan ayaa ku jira xidhmada sidoo kale waxaa ku jira waxyaabo gaarka ah sida saabuun, caraf iyo caday. Haddii aad u baahan tahay, waxaan sidoo kale heli kartaa xafayada iyo caanaha dhalaanka.

Xidhmbada waa lacag la'aan. Xidhmada waxay ku siin doonaan rashiinka aasasi oo kugu filan iyo agabyo shaqsiga ilaa labo toddobaad. Waad heli doonaa rashiin kugu filan iyo agabyo kale adiga iyo qof walba oo kula nool.

### Cuntooyinka

Haddii aad xanuunsanaysid ama aadan awoodin inaad cunto karsato, waxaa laga yabaa in lagu keeno cunto bisil. Marka aad wacdo, faafaahintaada ayaa la siinaya dowladda hoose waxayna kaala soo xidhiidhi doonaan wax ku saabsan ikhtiyaarada taageerada.

### Sidee ayaan ku helayaa xidhmada?

Xidhmada waxaa loogu dhigi doonaa albaabkaaga hortiisa si aad u qadato.

To receive this publication in a different format [email covid-19@dhhs.vic.gov.au](mailto:covid-19@dhhs.vic.gov.au) <covid-19@dhhs.vic.gov.au>.

Authorised and published by the Victorian Government, 1 Treasury Place, Melbourne.

© State of Victoria, Australia, Department of Health and Human Services, 27 August 2020.

Available at [DHHS.vic -Translated resources - coronavirus \(COVID-19\)](https://www.dhhs.vic.gov.au/translated-resources-coronavirus-disease-covid-19) <https://www.dhhs.vic.gov.au/translated-resources-coronavirus-disease-covid-19>

Emergency Relief Packages - Somali